IIB MA GALO

# الجريدة الرسمية
# FAAFINTA RASMIGA AH

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 6aad — Muqdisho 1 Jennaayo 1979 L. 1

**Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S.**

FAAFINTA BIL SOO BAXA — جريدة شهرية

**QIIMADU:** waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Somaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qortitaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — **Lacagta waxaa lagu bixinayaa** Xafiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

## KOOBNIIN

**QAYBTA KOWAAD**

SHARCI

W. M.

**QAYBTA LABAAD**

XEER

XEER MADAXWEYNAHA JDS. L. 1 ee 6 Dis. 1978, Abuurid Safaarad Soomaaliyeed, oo saldhigeedu ahaan doono Magaalada Belgrade — Yugoslavia. — Bog 1

XEER MADAXWEYNAHA JDS. L. 2 ee 6 Dis. 1978, Abuurid Safaarad Soomaaliyeed, oo saldhigeedu, ahaan doono Magaalada Ottawa — Kanada. — « 2

XEER MADAXWEYNAHA JDS. L. 3 ee 6 Dis. 1978, Abuurid Safaarad Soomaaliyeed, oo saldhigeedu ahaan doono Magaalada Ankara — Turkiya — « 3

**QAYBTA SADDEXAAD**

**TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO LA MID AH**

WARSHADDA MARMARKA IWM. (I. S. M. A. S.p.A.), 27 Disember 78. Ogysiis Saamilayda Sharikadda. L. 1 — 4

## QAYBTA LABAAD

XEER

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 1 ee 6 Dis. 78, Abuurid Safaarad Soomaaliyeed, oo Saldhigeedu ahaan doono Magaalada Belgrade— Yugoslavia.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

AYADOO LA ARKAY: Xaashida 1aad tan 2aad iyo tan 3aad ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya oo u wareejiney-sey Maamulka Sharciga Dawladda iyo Qawaaniinta Dalka.

AYADOO LA ARKAY: Sharciga ay ku dhisantahay Jamhuuri-yadda Dimoqraadiga Soomaaliya oo la socda Ruuxa Kaca-anka.

AYADOO LA ARKAY: Sharciga ay ku dhisantahay Dawladdu, Sharci lambar 14 ee 3dii Juunyo 1962.

AYADOO LA ARKAY: Sharciga dhismaha Wasaaradda Arrima-ha Dibedda, lambar 9 oo 8dii Settembre 1971, iyo Sharciga lambarkiisu yahay 36 ee 26kii Abril 1973 (FOREIGN SER-VICE LAW).

AYADOO LA TIXGELINAYO: Talooyinka ay soo jeedisay Wa-saaradda Arrimaha Dibedda.

**AMARXEER**

QODOBKA 1AAD

Waxaa la gartay in la abuuro Safaarad Soomaaliyeed, oo sal-dhigeedu ahaan doono Magaalada Belgrado — Yugoslavia.

Muqdisho, 6 Dis. 1978.

MADAXWEYNAHA J. D. S.

Jaalle S/Gaas Maxamed Siyaad Barre

WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINNAY

Diiwaanka Lam. 1 bogga lamb. 143

Muqdisho, 18 Dis 1978

Ku Xigeenka Hantidhowraha Guud
Sax. Yuusuf Cali Nuur

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 2 ee 6 Dis. 78, Abuurid Safaarad Soomaaliyeed, oo saldhigeedu ahaan doono Magaalada Ottawa — Kanada.

AYADOO LA ARKAY: Xaashida 1aad, tan 2aad iyo tan 3aad ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya oo u wareejineysey Maamulka Sharciga Dawladda iyo Qawaanaanta Dalka.

AYADOO LA ARKAY: Sharciga ay ku dhisantahay Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya oo la socda Ruuxa Kacaanka.

AYADOO LA ARKAY: Sarciga ay ku dhisantahay Dawladdu, Sharci lambar 14 ee 3dii Juunyo 1962.

AYADOO LA ARKAY: Sharciga dhismaha Wasaaradda Arrimaha Dibedda, lambar 9 ee 8dii Settember 1971, iyo Sharci lambarkiisu yahay 36 oo 26kii Abril 1973 (FOREIGN SERVICE LAW).

AYADOO LA TIXGELINAYO: Talooyinka ay soo jeedisay Wasaaradda Arrimaha Dibedda.

**AMARXEER**

QODOBKA 1AAD

Waxaa la gartay in la abuuro Safaarad Soomaaliyeed, oo saldhigeedu ahaan doona Magaalada Ottawa — Kanada.

Muqdisho, 6 Dis. 1978.

Jaalle S/Gaas Maxamed Siyaad Barre

MADAXWEYNAHA J. D.S.

WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGEYINNAY
Diiwaanka Lamb. 1 ———— bogga lamb. 142

Muqdisho, 18 Dis. 1978

Ku Xigeenka Hantidhowraha Guud

Sax. Yuusuf Cali Nuur

XEER MADAXWEYNAHA JDS. L. 3 ee 6 Dis. 78, Abuurid Safaarad Soomaaliyeed, oo saldhigeedu ahaan doono Magaalada Ankara Turkiya. —

AYADOO LA ARKAY: Xaashida 1aad, tan 2aad iyo tan 3aad ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya oo u wareejineysey Maamulka Sharciga Dawladda iyo Qawaaniinta Dalka.

AYADOO LA ARKAY: Sharciga ay ku dhisantahay Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya oo la socda Ruuxa Kacaanka.

AYADOO LA ARKAY: Sharciga ay ku dhisantahay Dawladdu, Sharci lambar 14 ee 3dii Juunyo 1962.

AYADOO LA ARKAY: Sharciga dhismaha Wasaaradda Arrimaha Dibedda, lambar 9 ee 8dii Settember 1971, iyo Sharciga lambarkiisu yahay 36 ee 26kii Abril 1973 (FOREIGN SERVICE LAW).

AYADOO LA TIXGELINAYO: Talooyinka ay soo jeedisay Wasaaradda Arrimaha Dibedda.

**AMARXEER**

QODOBKA 1AAD

Waxaa la gartay in la abuuro Safaarad Soomaaliyeed, oo saldhigeedu ahaan doono Magaalada Ankara — Turkiya.

Muqdisho, 6 Dis. 1978.

Jaalle S/Gaas Maxamed Siyaad Barre

MADAXWEYNAHA J. D. S.

WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINAY

Diiwaanka lamb. 1 bogga lamb. 144

Muqdisho, 18 Dic. 1978

Ku Xigeenka Hantidhowraha Guud

Sax Yuusuf Cali Nuur

## OGEYSIIS (I. S. M. A. S. p. A.)

Warshadda Marmarka iwm. (I.S.M.A.) ahna Shirkad Saamiley ah, saldhigeeduna yahay Muqdisho, waxay ogysiinaysaa dhammaan saamilayda Shirkadda, inta soo socota:

### QOD. 1AAD

Iyadoo Shirkaddu hayso caddad saamiyaal ah waxaa la ogeysiinayaa saamilayda ninkii doonaya inuu Warshadda ka iibsankaro 15 maalmood gudaheeda ka bilaabato 10ka Jennaayo 1979.

Sababta iyaga u gaar ah darteed waxaa dhammaan saamilayda loo bandhigayaa xigsiinta iibka saamiyaashaas.

Ayna ku soo warceliyaan wakhtiga kor ku xusan iyo muddadaas loo qabtay dhexdeeda Maamulka Shirkadda.

### QOD. 2AAD.

Haddii ilaa intaas aan cidna soo weydiisan iibkaas, waxay u fasaxan yihiin inay ka iibsan karaan Warshadda ciddii kale oo doonaysa.

Muqdisho, 27 Dis. 78.

WARSHADDA MARMARKA IWM.

MAAMULKA IDMAN

**(JAAMAC GAANI AXMED)**